

Su'aalaha badanka la iswaydiiyo ee ku saabsan wareejinta xisaabaha dhigaalka guriga

- 1. Sidee jadwalka loo qaabeeyaa?**
Xawilaada bangiga ee dhigaalada guriga HSB waxay bilaabmi doonaan Abriil waxayna socon ilaa iyo Oktoobar 2020. Tiro cayiman oo dhigaalada guriga ah ayey bangiyadu xawili doonaan maalin kasta inta wakhtigaasi lagu jiro.
- 2. Goorma ayaan wareejin karka dhigaaladayda guriga?**
Waxaad ka heli doontaa iimeyl HSB markii ay gaarto inaad u kala wareejiso bangiyada dhigaaladaada guriga. Tani mararka qaar waxay u dhaxayn doontaa Abriil iyo Oktoobar 2020. Waxaad heli doontaa waraaq boostada laguu soo dhigo haddii aadan hore ugu gudbin iimeylkaaga HSB.
- 3. Goorma ayaan xawili karaa dhigaalada guriga ilmahayga?**
Carruurta waxa waraaq loo soo dhigi doonaa boostada taasi oo siinaysa macluumaad kusaabsan marka adiga, masuulkiisa ahaan, ay tahay inaad wareejiso dhigaaladiisa guriga. Waraaqdan waxa loo diri doonaa cinwaanka diiwaangashan ee ilmaha xilli u dhexeeya Abriil iyo Oktoobar 2020.
- 4. Miyey tahay inaan u wareejiyo dhigaaladayda guriga Danske Bank?**
Waxaad u baahan tahay inaad u xawisho HSB Bospar si aad u sii haysato dhibcahaaga dhigaalka guriga. HSB waxay dhammaystirtay dariiq helitaanka bangiga ah, Danske Bank-na wuxuu la yimi soo jeedin taasi oo sida ugu fiican ugu habboon shuruudaha dhigaalada guriga ee HSB. Tani waa sababta dhammaan dhigaalada guriga ay hadda tahay inay u wareejiyaan xisaabaha dhigaalka guriga Danske Bank 2020. Qof kasta wuxuu ka heli doonaa macluumaad HSB markii ay gaardho kolka uu xisaabtiisa wareejinayo.
- 5. Kahor inta aanan bilaabin dalbashada inaan ka wareejiyo HSB Bospar-ka aan leeyahay Swedbank una wareejiyo Danske Bank, miyay noqon doontaa fikrad fiican inaan xasuusnaado?**
Ka feker qaababka dhigaalada aad jeclaan lahayd inaad doorato, ka sokow dhigaalka HSB Bosparkonto. Wax badan halka ka baro: danskebank.se/hsb.
Haddii dhigaalka guriga aad u xawilayso ilme yar, samee nuqul dhijitaal ah ee aqoonsiga labada masuul sidoo kale, maxaa yeelay waxaad u baahan doontaa inaad soo geliso maadaama ay ka qayb tahay hannaankaaga dalabka.
- 6. Maxaa dhici doona haddii aanan wareejin kaydka gurigayga?**
Haddii aad wareejin waydo dhigaalka gurigaaga 2020, dhigaalkaaga Swedbank wuxuu isku baddali doonaa xisaab dhigaal oo caadi ah waxaanad lumin doontaa dhibcahaaga dhigaalka guriga.
- 7. Noocyadee kayd in ah ayuu Danske Bank siiyaa HSB home savers?**
Waxaannu bixinaa HSB Bosparkonto, xisaab qiime go'an oo leh muddo ku-xirnaansho oo saddex sano ah iyo Depå för fondsparande oo leh 13 sanduuq oo la kala doorto. Halkan wax badan ka ogow: danskebank.se/hsb.
- 8. Ma xawili karaa maaliyada HSB Bospar?**
Haddii hanti ay kuu taallo Swedbank, sheerarkaan waxaa lagu wareejinayaa hab ku aadan oo kaydsho ah (HSB Depå) kaasoo laga helo Danske Bank Hantida lama iibinayo, sidaa darteed uma baahnid in aad canshuur ku caddayso waxkasta oo faaido ah. Waxa aad sii wadi kartaa inaad sii haysato deeqdaada Swedbank oo lagu soo xawilo, laakiin dhamaan kaydka cusub waxaa la dhici doonaa Danske Banks kaas oo ah deeq meesha ku salaysan wixii intaa ka danbeeya. *Wixii macluumaad dheeraad ah ee kaydiyaha deeqda ee Danske Banks waxaa laga heli karaa halka* (danskebank.se/hsbdepa).
- 9. Miyuu Danske Bank bixiyaa ISK marka la eego xisaabaha dhigaalka guriga HSB?**
Tan hadda ma bixino, laakiin waxaannu ku talo jirnaa inaanu awoodno inaanu bixinno xisaabaha dhigaalka guriga oo ISK ah mustaqbalka.
- 10. Intee ayey qaadan doontaa xawilaada dhigaalada gurigu?**
Xawilaada dhigaalada gurigu waxay qaadan doontaa ilaa 1 ilaa 4 toddobaad. Wakhiga loo baahan yahay wuu kala duwanaan doonaa iyadoo ku xiran noocyada dhigaalka ee aad haysato. Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan xiritaanka akoonkaaga Swedbank marka HSB Bospar lagu wareejiyo Danske Bank. Tani waxay la micno tahay in kaydsga gurigu dhammaystirmay.
- 11. Miyey tahay inaan sameeyo nidaam xawilaad joogto ah oo cusub markii xawilaada la samaynayo?**
Haa, waad samayn. Waxaad u baahan doontaa inaad samayso dalab shaqaynaya oo ka yimid baankaasga HSB Bosparkonto kaaga marka aad ku beddesho bangiyada wixii ah kaydsga guriga ilmahaaga.

12. Hadii aanan lahayn BankID ama ay tahay inaad kaydka guriga ilmaha yar inaan wareejiyo, sidee ayaan u gelin karaa nuqulka aqoonsigayga arjiga?

Raac tallaabooyinkan:

- Waxa aad sawir kaga qaadaa aqoonsigaaga (Iiisankaaga gaadhiga, baasboorkaaga ama kaadhkaaga aqoonsiga) taleegankaaga gacanta.
- Ka gal ciwaankaaga iimaylkaaga teleefoonkaaga gacanta kuna lifaaqi kartaa sawirrada iimayl aad adigu isu dirto.
- Ka gal ciwaanka iimayl kaaga kombuyuutarka kuna kaydi sawirka kombuyuutarka.
- Intaa ka dib waxa aad ka sii wadi kartaa codsigaaga kombuyuutarkaaga adigoo riixaya batoonka 'Ladda upp dokument' ee u dhow qaybta hoose ee foomka.
- Geli sawirka aqoonsigaaga oo kadibna riix badhanka 'Skicka'.

Hadii aad u kaydinaiso ilmo yar, waa inaad soo gudbisaa aqoonsiga (Iiisanka gaadhiga, baasboorka ama kaadhka aqoonsiga) ee dhamaan koriyayaasha sida kor lagu sheegey.